

Hawo-mareenkaaga iyo neefsashadaada inta lagu gudo jiro suuxdinta


Buug-yarahaan wuxuu sharraxayaa sababta iyo sida dhakhtarka suuxinta u maareeyo hawo-mareenkaaga iyo neefsashadaada inta lagu gudo jiro suuxdinta.

Tusmada buugga

- Waa maxay hawo-mareenku.
- Maxay lagama maarmaan u tahay in la maareeyo hawo mareenkaaga inta uu socdo qalliinka.
- Sidee loo qiimeeyaa hawo mareenkaaga qalliinka ka hor.
- Sidee loo maareeyaa hawo mareenkaaga inta lagu gudo jiro qalliinka.
- Halista iyo go'aan gaarista la isla wadaago.

Hawo-mareenkaaga iyo neefsashadaada

Markaad neefsato, hawadu waxay ka soo galeysaa sankaa iyo afkaaga waxayna soo maraysaa cunahaaga, sanduuqa codka ee hunguricaddaha si ay u gaarto sambabadaada. Isku dhafka qaababkan waxaa badanaa loo yaqaan 'hawo mareen'. Jirkaagu wuxuu ka qaataa oksijiinta uu u baahan yahay hawadan.




Gaarsiinta oksijiinka ee sambabada inta lagu gudo jiro suuxinta (qaabaynta hawo mareenkaaga)

Hubinta in oksijiinku uu dhex mari karo hawo mareenkaaga uuna gaari karo sambabada waa qeyb muhiim ah marka la samaynayo suuxinta guud. Dhakhaatiirta suuxinta waxaa loo tababaray inay qiimeeyaan hawo mareenkaaga ayna maareeyaan neefsashadaada inta lagu gudo jiro suuxinta. Waxay sidoo kale masuul ka yihiin in ay kula tacaalaan inta ay socoto suuxdinta, ayna hubiyaan inaad badqabtid xilli walba aadna si raaxo leh usoo miyirsatid.

Inta lagu gudo jiro suuxinta guud, murqaha jirkaaga waa ay dabcaan, oo ay ku jiraan murqaha dhuunta iyo kuwa xabadka. Tani waxay keeni kartaa in hawo mareenkaagu uu xirmo ama neefsashadaadu ay xannibanto. Si loo hubiyo in qulqul joogto ah oo oksijiin uu gaarayo sambabkaaga, dhakhtarka suuxinta wuxuu tubbo galin karaa hunguri-cadkaaga si uu hawo-mareenkaaga u furo - tan ayaana loo yaqaan tubbo galinta hunguricaddaha.


Hawo-mareen furan

Waxaa jira marin waadax ah oo uu oksijiinku ku galo sambabada, kaarboon laba ogsaydkana uga soo baxo bannaanka.



Hawo-mareen xiran

Xirnaanshaha wuxuu diidayaa in oksijiinku si fudud ku galo sambabada, kaarboon laba ogsaydkana uga soo baxo bannaanka.



Badanaa waxaa tubbada la galiyaa marka dawooyinka suuxinta lagu siiyo iyo marka aad huruddo ka dib, si aadan u dareemin galinteeda.

Waxaa jira marar ay badqab tahay in 'tubbada lagu galiyo adigoo soo jeeda', taasoo tubbada la galinayo hawo-mareenka ka hor inta aan lagu siin dawooyinka suuxinta. Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan **'tubbo galinta marinka hawo-mareenka qofka oo soo jeeda'** halkan: <https://bit.ly/DAS-AwakeIntubation>

Suuxiyuhu wuxuu kaala doodi doonaa habka uu u malaynayo in uu kuugu ammaan badan yahay. Inta ugu badan tubbo galinta marinka neef-mareenka ee bukaanka waxaa la sameeyaa marka bukaanku uu suuxsan yahay.

Si aad u ogaatid macluumaad badan oo ku saabsan suuxinta iyo qeybaha kala duwan ee suuxinta, waxaad ka akhriin kartaa buug-yaraheenna: **Adiga iyo suuxintaada**. Fadlan ka eeg webseydkeenna nuqul ka mid ah buug-yaraha kaasoo halkan ku diyaarsan asaga oo afaf kala duwan ku qoran: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

Sida loo qiimeeyo hawo-mareenkaaga qalliinka ka hor

Suuxiyayaashu waxay u baahan yihiin in ay qiimeeyaan hawo-mareenkaaga si ay u qorsheeyaan habka ugu badqabka badan ee loo maareynayo suuxintaada. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo guud oo ku saabsan xaaladahaaga caafimaad iyo haddii aad soo martay suuxin hore. Waxay kaa eegi doonaan inaad leedahay cillad kuu diidi karta inaad si xor ah u dhaqdhaqaaqjisid qoortaada. Waxay sidoo kale hubin doonaan in dhibaato kaa haysato inaad si buuxda u kala furto afka, dhibaatooyinka laabjeexa ama arrimo afka iyo ilkaha ah oo muhiim ah. Haddii buro ama barar aad ku leedahay hawo-mareenka ama qoorta, suuxiyuhu wuxuu adeegsan doonaa ultrasound ama CT (computed tomography) marka uu samaynayo qiimaynta.

Suuxiyuhu wuxuu kaa dalban doonaa inaad samaysid tijaabooyin fudud si aad u aragtid:

- In aad si fiican afkaaga u kala furi karto iyo in dalqadaada si fudud loo arki karo
- Sida daankaagu u dhaqdhaqaaqayo iyagoo kaa dalban doona inaad dhaqaaqjisid daankaaga hoose ama aad qaniintid faruurtaada kore
- Inaad qoortaada u dhaqdhaqaaqjin kartid siyaabo kala duwan aadna samayn kartid jimicsiyo fudud.

Marmar, waxay u baahan karaan inay fiiriyaan sankaga iyagoo adeegsanaya kaamiro yar oo dabacsan - waana hab aadan xanuun ku dareemayn.

Haddii horey laguugu sheegay in caqabad lagala kulmay maaraynta neef-mareenkaaga ama neefsashadaada, waa muhiim inaad ogaysiisid dhakhtarta suuxiyaha ah. Dhakhtarta suuxiyaha ah wuxuu u baahan karaan in uu eego diiwaanka suuxdintaadii hore haddii la heli karo.

Ka hor inta aysan bilowmin suuxdinta guud, waxaa lagu waydiisan doonaa inaad neefsato ogsijiin adigoo ka qaadanaya maaskarada balaastikada ah ama tubooyinka caagagga jilicsan oo la geliyo duleelka sankaa. Tani waxay kordhinaysaa xaddiga oksijiin ee sambabadaada.

Ka warran haddii ay jiraan caqabado lagala kulmo maaraynta neef-mareenkayga?

Haddii neef-mareenkaagu uu baahanayo maarayn khaas ah suuxdimaha dambe ee muqtaqbalka, suuxiyuhu wuxuu (adigoo oggol) macluumaadkaaga galin karaa keydka xogta Neef-mareenka Adag ee Difficult Airway Database.

Waxay kuu jari doonaan kaar muujinaya caqabadahaaga dhanka neef-mareenka, oo aad u qaadanayso isbitaallada kale ee aad tagi doonto. Waa muhiim inaad kaarkaano tusto dhakhtarkaaga guud (GP) si loo hubiyo in macluumaadka ay ku jiraan diiwaankaaga.

Macluumaadka ku saabsan kaarka muujinaya caqabadaha neef-mareenka waxaa laga heli karaa mareegaha DAS:

www.das.uk.com/aac/patient_information

Halista iyo go'aan gaarista la isla wadaago

Dawooyinka suuxinta casriga ah aad bay badbaado u tahay. Waxaa jira xoogaa waxyeellooyin ah oo badanaa ka dhasha dawooyinka suuxinta ama qalabka la adeegsado, oo ay ku jiraan qalabka loo adeegsado in looga hawl-galo neef-mareenkaaga. kunwani badanaa ma halis badna mana raagaan.

Fadlan ka eeg mareegteenna faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan khataraha yaryar ee la xiriira suuxinta kaas oo aad ka heli karto luuqado kala duwan halkan:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

Waxaa jira khataro badan oo daran oo la xiriira bukaannada qaba dhibaatooyinka neef-mareenka, in kastoo aysan badnayn, ama ay dhif yihiin. Cilmi-baaris wayn oo laga sameeyay dhibaatooyinka ka dhasha maaraynta neef-mareenka ayaa lagu ogaaday in hal dhibaato oo weyn ay ku dhacdo 22,000 ee kasta oo lagu sameeyo suuxin guud. Tani waxay u dhigantaa hal qof oo ku nool magaalo yar.

Si kastaba ha ahaatee, khatarahaaga khaaska ah waxay ku xirnaan doonaan xaaladdaada jir ahaaneed iyo nooca qalliin ee lagu samaynayo. Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doono khataraha ay aaminsan yihiin inay kuugu daran yihiin.

Dhibaatooyinka ka dhalan kara ka hawl-galidda neef-mareenka bukaanka waxaa ka mid ah kuwaan soo socda.

Tubbo galinta oo lagu guuldarraysto

Mararka qaar ayay suuxiyaha billowga hore ku adkaanaysaa ama aysan u suurtoobayn inuu tubbo galiyo hunguri-cadkaaga tan ayaana loo yaqaan 'tubbo galin guuldarraysatay'. Dhakhtarka suuxinta wuxuu go'aansan karaa inuu ku toosiyo oo

qalliinkaaga dib u dhigo. Taas beddelkeeda, wuxuu go'aansan karaa in uu adeegsado hab kale oo ka mid ah hababka kala duwan ee tubbooyinka lagu galiyo neef-mareenka. Tubbo galinta guuldarreysata ma badna, laakiinse, si kastaba ha ahaatee, waxay ku badan tahay haweenka uurka leh ee ku jira xaaladaha deg-degga ah iyo bukaannada u baahan qalliin deg-deg ah oo la adeegsanayo suuxin guud.

Saxasho

Marar dhif ah ayaa waxaa jiri kara dhibaatooyin daran oo ka dhasha cillado ka jira hawo mareenka bukaanka. Tan waxaa sababi kara in waxyaabaha ku jira caloosha ay sambabaha aadaan, waxaa loo yaqaan ku-saxasho.

Marar dhif ah, dhibaatooyinka neef-mareenka ee halista ah waxay horseedi karaan in si lama filaan ah oo loogu gudbiyo qeybta daryeelka xaaladaha adag, dhaawac maskaxeed iyo dhimasho.

Waxa aad sameyn karto si aad u yareyso khatartaada

Jir-dhisnaanta iyo hab-nololeedka

Bukaannada Jir-dhisnaanta ee awood u leh inay sare u hagaajiyaan caafimaadooda iyo hab-nololeedkooda waxay si dhakhso ah uga soo kabtaan qalliinka waliba si dhib yari ah.

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn kartid si aad isugu diyaarisid qalliinka. Xitaa isbeddellada yaryar waxay yeelan karaan waxtar weyn. Waxaad u baahan kartaa inaad kordhiso heerka jimicsigaaga aadna hagaajiso cuntadaada. Haddii aad khamri cabto ama aad sigaar cabto, waa inaad ka fikirtaa inaad iska jarto ama aad joojiso.

Haddii aad qabto dhibaato caafimaad oo soo jireen ah, kala tasho dhakhtarkaaga gaarka ah ee qalliinka haddii ay jiraan wax aad samayn karto si aad u hagaajisid qalliinka ka hor.

Haddii aad leedahay cayilka daran ama miisaan badan, tani waxay ku keeni kartaa suuxiyaha inuu ku dhibtoodo maaraynta neef-mareenkaaga waxaana muhiim ah inaad dhintid miisaankaaga qalliinka ka hor.

Keydadkeenna **Dhisan wanaagsan dhaqso ah** waxay ku siin doonaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u noqoto qof jir-dhisnaanta oo si fiican ugu diyaargarroobo qalliinka. Fadlan ka eeg barteena nuqul ka mid ah buug-yaraha kaasoo halkan ku diyaarsan asaga oo afaf kala duwan ku qoran:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

ilkaha

Aad ayay muhiim u tahay in aad dhakhtarta suuxiyaha u sheegtid haddii ay ilkahaagu wax dhaawac ah leeyihiin. Waxaa haboon inaad fixgelinsiiso inaad booqatid dhaqtarka ilkaha ka hor qalliinkaaga.

Joojinta cuntada iyo dawooyinka bilowga ah

Waxaa muhiim ah inaad si foajigan u raacdo tilmaamaha ku saabsan xilliga aad joojineysid cunista iyo cabidda kahor Suuxdinta. Waa inaad joojisaa cunista lix saacadood kahor qalliinka cabbidana labo saacadood kahor. Haddii lagu qoray daawo laabjeex, waa muhiim inaad qaadatao si loo yareeyo halista saxashada.

Carqaladaynta neefsashada hurdada dhexdeeda

Haddi aad leedahay carqaladaynta neefsashada hurdada dhexdeeda, waxaad halis ugu jirtaa dhibaatooyin marinka neefta ah. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad habeen ku qaadatao isbitaalka qalliinka kadib waxaana si dhow laguugu ilaalin doonaa suuxdinta kadib. Haddii aad leedahay mashiinka caawiya neefsashada (CPAP), waa inaad horay usoo qaadataa.

Garka/timaha wajiga

Dhakhtarta suuxiyaha wuxuu u baahan yahay inuu adeegsado Af-xir si fiican ugu dhagaya si uu bukaanka u siiyo oksijiin. Garka adag wuxuu hor istaagayaa in Af-xirku si fiican ugu dhago afka. Dhakhtarta suuxiyaha ah wuu kula wadaagi doonaa haddii ay jirto halis ah in Af-xirku uusan si sax u shaqayn iyo waxa lagu xallin karo.

Hab-jarriinka/timaha dhaadheer

Dhakhtarta suuxiyaha ah wuxuu u baahan yahay inuu si xor ah u dhaqdhaqaaqin karo qoortaada si uu u maamulo marinka neefta. Waxaa wanaagsan in wax badan laga jaro timaha dhaadheer suuxdinta kahor , sababtoo ah tani waxay hor istaagaysaa dhaqdhaqaaqa qoortaada.

Go'aan gaaris leysla wadaago

Go'aan gaarista leysla wadaago waxay hubisaa in shakhsiyaadka la taageero si ay u gaaraan go'aamo iyaga ku habboon. Waa hab wada shaqeyneed oo uu takhtarku ku taageero bukaanka si uu go'aan oga gaadho daawaynta.

Wada sheekeysigu wuxuu isku keenaa:

- khibrada dhakhtarka, sida kala doorashada daawaynta, caddaynta, halisaha iyo faaidooyinka
- waxa uu bukaanku si fiican u garanayo: dookhooda, duruufahooda gaarka ah, yolalka, dhaqankooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

Wax badan ka ogow halkaan:

www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making

Waa kuwan qaar ka mid ah qalabyada aad isticmaali karto si aad sida ugu fiican uga faa'iidayso wada-hadalladaada aad la yeelato dhakhtarka suuxiyaha ah ama shaqaalaha qiimaynta qalliinka ka hor:

Doorashada caqliyaysan ee habka BRAN ee UK

U isticmaal tan xasuusin ahaan si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan daweynta.

https://bit.ly/CWUK_leaflet

waydii waaxda caafimaadka ee NHS seddex su'aalood

Waxaa jiri kara xolashooyin ku saabsan daryeelkaaga caafimaad.

https://bit.ly/NHS_A3Qs

Xarunta Daryeelka xilliyada Qalliinka (CPOC)

CPOC waxay soo saartay muuqaal garaafyo ah si ay kuugu sharaxdo go'aan qaadashada la isla wadaago.

www.cpoc.org.uk/shared-decision-making

Su'aalaha aad jeclaan laheyd in aad weydiiso

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor (waxaad isticmaali kartaa tuusaloooyinka hoose kadibna ku darso su'aalahaaga meesha bannaan ee ayaga ka hooseeya). Haddii aad rabto inaad la hadasho dhakhtarkaaga suuxinta kahor maalinta qalliinkaaga, la xiriir kooxda qiimaynta qalliinka ka hor kuwaas oo kuu diyaarin doona inaad taleefanka kula hadasho dhakhtarka suuxiyaha ama inaad ku aragtid xarunta caafimaadka.

1 Ma jiraan dhibaatooyin marinkayga neefta ah?

2 Ma jiraa khataro gaar ah oo aan leeyahay?

3 ...

4 ...

5 ...

Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix

(www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg sida ay kula tahay

Haddii aad hayso faallooyin guud, fadlan imaylka ku soo dir:

patientinformation@rcoa.ac.uk

Koleejka Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaadda Labaad, Oktoobar 2023

Buug yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

© 2023 Koleejka Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta

Buug-yarahan waxaa lagu nuqulan karaa ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadnaq ku habboon waxaana laga saarayaa calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.